



SOMALI

Barnaamijka ORCA LIFT ee nooliga la dhimay ee dadka dakhligoodu u qalmo

Meesha aad rabto in aad tagto gaadh. Kharash aad u yarna ku gaadh.

Waxa imika suurtoagal ah in kharash la awoodi karo lagu tago shaqada ama iskuulka ama goobaha dukaamaysiga ama goobaha xanaanada caruurta ama meel kasta oo kale oo aad rabto in aad tagto. Waa nidaamka ORCA LIFT, kaas oo ah nooli la dhimay oo kaa caawin kara in aad si wayn uga faa'adaysato nidaamka gaadiidka dadweynaha.

Marka la go'aamiyo in aad u qalanto barnaamijka ORCA LIFT, waxa lagu siin doonaa kaadh ah ORCA LIFT oo magacaaga ku diiwaan gashan, oo leh sifooyin la mid ah dhamaan sifooyinka kaadhahka ORCA. Waxa aad kaadhkaaga ku shuban kartaa nidaamka lacagta E-purse si aad isaga bixiso kharashka safarada mar kasta oo aad safar u baxdo, ama waxa aad kaadhkaaga ku shuban kartaa lacag bishii hal mar lagu shubto oo qiima dhimis wadata oo kuu saamaxaysa in aad si aan xadidnayn aad inta jeer ee aad rabto gaadiidka ku raacdo bisha gudeheeda.

Laakiin wanaaga nidaamka ORCA LIFT waxa weeyaan waxa uu leeyahay dhamaan awoodda iyo habboonaanta nidaamka kaadhahka ORCA isagoo waliba ka kharash jaban.

Iyaga oo adeegsanaya kaadhka ORCA LIFT, dadka gaadiidka raaca ee dakhligoodu u qalmo waxa u dhigmaya boqolkiiba 50 ama ka badan oo ah kharashka ay ku bixiyaan:

- Basaska Metro Transit
- Basaska Kitsap Transit
- Tareenka fudud ee Sound Transit Link
- Taksiga biyaha ee Degmada King
- Tareenka taraamka ee Seattle

Sidee loo heli karaa kaadhka ORCA LIFT

Tallaabada 1aad:

Booqo orcalift.com ama wac (206) 553-3000 ama (800) 756-5437 si aad u ogaato in aad u qalanto. In aad u qalanto iyo in kale waxay ku xidhan tahay dakhliga qoyskaaga.

Tallaabada 2aad:

Shakhsiyan codsi u gudbi mid ka mid ah xafiisyada diiwaan galinta ee ku yaala Degmada King isla markaana qaado kaadhka ORCA LIFT.

Tallaabada 3aad:

Lacag ku shubo kaadhkaaga ORCA LIFT kuna isticmaal gaadiidka transit-ka si la mid ah dadka kale ee adeegsada kaadhka ORCA, sidaasna LACAG HAKUUGU DHIGANTO!

Maxaad u baahan tahay si aad ugu qalanto

Xaddiga dakhliga qoyskaaga

Dadka dakhligoodu ka yaryahay heerka saboolnimada federaalka oo la libin laabay (sida ay hirgalisay Waaxda Maraykanka ee Caafimaadka iyo Adeegyada Dadku) way u qalmaan kaadhka ORCA LIFT.

Xaddiga ugu sarreya ee dakhliga qoyska ee u qalma:

<i>Tirada</i>	<i>Dakhliga qoyska</i>
<i>Qoyska</i>	<i>ee ugu sarreya</i>
1	\$23,540
2	\$31,860
3	\$40,180
4	\$48,500
5	\$56,820
6	\$65,140
7	\$73,460
8	\$81,780

Hadii aad is leedahay waad u qalantaa, booqo mid ka mid ah xafiisyada diiwaan galinta ORCA LIFT adigoo sita waraaqaha caddaynaya dakhligaaga si aad u caddayso in aad u qalanto. Kadib xafiisku si rasmi ah ayuu kuu diiwaan galin doonaa kuuna siin doonaa kaadhkaaga ORCA LIFT ee bilaashka ah.

Dhukumantiyada xaqiijinta dakhliga qofka

Hadii aad hore ugu jirtay mid kamid ah barnaamijyada gunnooyinka kaalmada ah:

- Dadka ka midka ah nidaamka caymiska ee Apple Health ama Medicaid: Waxa dakhligooga lagu xaqiijin karaa kaadhka adeegyada caafimaadka ee ProviderOne. Hayada ayaa xaqiijin karta in aad wakhtigan xaadirka ah buuxisay shuruudaha iyadoo adeegsanaysa barta internetka ee washingtonconnect.org.
- Dadka ka diiwaan gashan Barnaamijka Washington ee Cuntada Aasaasiga ah: Waxa dakhligooga lagu xaqiijin karaa kaadhka EBT (xawilaada kaalmooyinka ee internetka). Hayada ayaa xaqiijin karta in aad wakhtigan xaadirka ah buuxisay shuruudaha iyadoo adeegsanaysa barta internetka ee washingtonconnect.org.
- Dadka ka diiwaan gashan Barnaamijka Kaalmada Ku-Meel Gaadhka ah ee Qoysaska Baahan (TANF): Hayada ayaa xaqiijin karta in aad wakhtigan xaadirka ah buuxisay shuruudaha iyadoo adeegsanaysa barta internetka ee washingtonconnect.org, ama adiga ayaa keeni kara nuqul ah warqaddii ku-guulaysiga kaalmada.

Hadii aad ku jirto barnaamij kale oo ah barnaamijyada gunnooyinka kaalmada ah:

- Waraaqda lacagbixinta caymiska shaqo la'aanta ay qaataan dadka bilaa camalka ah ee la kaalmeeyo.
- Waraaqaha ku-guulaysiga qaadashada Dakhliga Dheeraadka ah ee Kaabista ah (SSI) iyo Caymiska Bulshada (Social Security) ama waraaqaha dadka qaata gunnada hawlgabka ee la siiyo shaqaalaha tareenada.
- Warqadda L&I ee qaadashada magdhowga la siiyo shaqaalaha.

Hadii aanad wax dakhli lahayn:

- Waxa dakhli la'aantooda lagu xaqiijin karaa waraaqda caddaynta Caymiska Shaqo La'aanta.
- Hadii aad waraaqaha aqoonsiga iyo Caymiska Shaqo La'aanta isa soo raaciso, waxa aad caddayn kartaa in aanad wax dakhli ah helin isla markaana aad u qalanto barnaamijka nooliga la dhimay.

Hadii aad shaqo haysato:

Qofka shaqeeya (ee qaata jeega mushaharada): waraaqaha lacag-qaadashada ee 30-kii cisho ee ugu dambeeyay.

Qofka shaqeeya (ee qaata lacag kaash ah):

Waraaq ka socota cidda aad u shaqayso oo saxeexan isla markaana taariikhaysan kuna dhigan yahay dakhliga guud ee aad heshay 30-kii cisho ee ugu dambeeyay; ama caddayn bangi (bank statement) oo adiga kaa socota hadii aad jeega mushaaradaada ku shubtay akoonkaaga bangiga.

Dadka iskood u shaqaysta:

Nuqul ah foomkaagii cashuurta ee ugu dambeeyay. Dakhliga waxa lagu jaangoynayaa dakhliga guud ee ku yaala foomkaagii cashuurta ee ugu dambeeyay: Foomka 1040 sadarka 37; Foomka 1040 A, sadarka 21; Foomka 1040 EZ, sadarka 4; ama qofku waxa uu buuxin karaa xaashida u gaarka ah dadka iyagu iskood u shaqaysta.

Dhukumentiyada caddaynaya cidada aad tahay

1. Aqoonsi sawir leh oo ay dawladu soo saartay
 - Liisanka Darawalka (gobol kasta ama dal kasta)
 - Aqoonsi sawir leh oo laga soo saaray gobol kasta ama degmo kasta ama dal kasta
 - Aqoonsiga ciidamada oo sawir leh
 - Kaadh Aqoonsi oo ay soo saartay qunsuliyad ka mid ah qunsuliyadaha
 - Baasaboorka dal kasta
 - Aqoonsi sawir leh oo waxbarasho – jaamacad ama kulliyad ama dugsi sare
 - Kaadh qabaa’ilka hindida maraykanka
 - Shahaadada muwaadinnimada maraykanka, qaadashada jinsiyadda (saxeex iyo sawir)
 - Nooc kasta oo kale oo ah aqoonsi sawir leh oo ay soo saartay hayad dawladi ah

- AMA -

2. Isku dhafka laba dhukumentiyada ama ka badan, kuwaas oo kala ah:
 - a. Dhukumentiyada aysan dawladi soo saarin oo muujinaya magacaaga iyo sawirkaaga iyo in aad tahay qof qaan-gaadh ah, iyo dhukumentiyada muujinaya magacaaga iyo taariikhda aad dhalatay, sida:
 - Waraaqaha korsashada
 - Diiwaanada baabtiiska masiixiga
 - Shahaadada dhalashada
 - Kaadhka ka gudbista xadka
 - Amar maxkamadeed
 - Kaadhka DHS ee “Macmiisha lagu Kalsoonyahay” (NEXUS, SENTRI, FAST)
 - Ogolaanshaha barista darawalnimada
 - Waraaqada Aqoonsiga Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (DSHS)
 - Kaadhka aqoonsiga ee shaqaalaha
 - Aqoonsiga dadka muhaajiriinta ah
 - Liisanka guurka
 - Diiwaannada waxbarashada / nuqulka fasallada ama transcript (oo shaabadaysan)
 - Kaadhka Caymiska Bulshada
 - Aqoonsiga Shaqaalaha Gaadiidka (TWIC)
 - Kaadhka shaqo la’aanta

Xagee laga heli karaa kaadhka ORCA LIFT

Xafiisyada diiwaan galinta ee kaadhka ORCA LIFT waxay ku yaalaan Degmada King. Xafiisyada waxa maamula hayada Caafimaadka Dadweynaha iyo hayadaha kale ee xusan. Si aad

u hesho tafaasiil buuxda oo ku saabsan goobaha xafiisyadu ku yaalaan iyo saacadaha shaqada, booqo orcalift.com ama wac (206) 553-3000 ama (800) 756-5437.

- Caafimaadka Dadweynaha – Degmada King
- Xarunta Adeegyada Bulshada Kaatooligga ee Galbeedka Washington
- Compass Housing Alliance
- El Centro de la Raza
- Global to Local
- Xarunta Multi-Service
- Isbahaysiga Qaxootiga ah Haweenka (ReWA)
- WithinReach
- YWCA
 - Seattle
 - King
 - Snohomish

SI AAD MEESHAAD DEGENTAHAY ISAGA DIIWAAN GALISO:

Marka laga yimaado xafiisyada is diiwaan galinta ee ORCA LIFT, Degmada King iyo ururada la shaqeeyaa waxay qabtaan munaasabado kala duwan oo ka dhaca deegaanada bulshooyinka kala duwan sannadka oo dhan. Wac (800) 756-5437 si aad u ogaato munaasabadaha soo socda ee ka dhici doona deegaankaaga.

Su'aalaha Muhiimka Ah

Hayadaha gaadiidka kuwee ayaa aqbala kaadhahka ORCA LIFT?

- Wakhtigan xaadirka ah kaadhahka ORCA LIFT waxa laga heli karaa Basaska Metro Transit, iyo Tareenka fudud ee Sound Transit Link, Tareenka taraamka ee Seattle, Taksiga biyaha ee Degmada King iyo Basaska Kitsap Transit.

Dhamaan hayadaha kale ee xubnaha ka ah ORCA way aqbali doonaan kaadhka ORCA LIFT, laakiin waa in qofka kaadhka sitaa uu bixiyaa nooliga wakhtigan laga qaado dadka waawayn si uu u helo adeegyada ay bixiyaan hayadahaas kaleeto. Hadii aad adeegsato nidaamka PugetPass oo aad nooliga iskaga bixiso, waxa lagaa bixin doonaa qiimaha safarka ee nidaamka PugetPass, waana in aad kharashka hadhay ku bixiso nidaamka lacagta ee E-purse ama kaash.

Dadka kaadhka haystaa waxa ay wici karaan lambarka ah 206-553-3000 si ay wax uga ogaadaan liiska wakhtigan xaadirka ah ee hayadaha gaadiidka ee iyagu qaatay ORCA.

Kaadhka ORCA LIFT waa intee kharashkiisu?

Waxba. Kaadhka bilaash ayay ku heli karaan dadka u qalma ee shuruudaha buuxiyay. Hadii kaadhku uu kaa lumo ama lagaa xado ama uu waxyeeloobo, kaadhka baddalka ah kharashkiisu waa 5 doolar. Qofka kaadhka adeegsanaya ayaa bixinaya lacagta lagu shubayo ee ah nidaamka E-purse ama nidaamka lacagta bishiiba mar lagu shubayo kaadhka.

Kaadhkayga ORCA LIFT miyuu wakhtigiisu dhamaan doonaa?

Kaadhka ORCA LIFT waxa uu ansax ahaanayaa 24 bilood (laba sanadood) laga bilaabo wakhtiga aad qaadatid. Intaa kadib, mar kale ayaad codsi soo gudbin kartaa si aad hadana u qaadato kaadhka. Taariikhda dhacistaanka kaadhkaaga waxa lagu dhigi doonaa kaadhka cagiisa dambe.

Maxaa dhacaya hadii qofku uu marka hore buuxiyo shuruuda barnaamijka ORCA LIFT kadibna uu helo dakhli boqolkiiba 200 ka badan heerka saboolnimada federaalka?

Qof kasta oo marka hore buuxiyo shuruudaha barnaamijka ORCA LIFT wuu sii wadan karaa ilaa inta uu kaadhkiisa wakhtigiisu uu dhacayo. Marka wakhtigaa la gaadho waa in uu qofku mar labaad codsi soo gudbiyo si uu barnaamijka uga mid noqdo waana in uu caddeeyaa in uu u qalmo.

Sideebuu u shaqaynayaa kaadhka ORCA LIFT

Sida kaadhka caadiga ah ee ORCA, ku shubo kaadhkaaga nidaamka lacagta E-purse ama lacagta bishiiba mar lagu shubo ka hor inta aanad isticmaalin.

1. Booqo mid ka mid ah goobaha lacagta lagaga shubto kaadhka ORCA ee ku yaala Degmada King si aad kaadhkaaga u buuxsato.
 - Xafiiska Adeegyada Macmiilka ee King Street Center
 - Istaanka Westlake, Xafiiska Adeegyada Macmiilka gaadiidka Metro ee Tanalka Transit-ka magaalada Seattle
 - Mashiinada kaadhka laga iibsado ee ku yaala Tanalka Transit-ka magaalada Seattle ama istaanada tareenada fudud ee Link iyo xarumaha transit ka qaarkood
 - Goobaha lagu iibiyo kaadhka ORCA
 - Barta internet ka ee orcacard.com
2. Laba siyaabood ayaad lacagta u bixin kartaa:
 - Ku shubo nidaamka PugetPass bishiiba mar si aad bishaas si aan xadaysnayn kaadhka aad gaadiidka ugu raacdo – sidan ayaa kuu fiican hadii aad kaadhka mar kasta adeegsatid.
 - Adeegso nidaamka E-purse si aad kaadhka ugu shubto lacag u dhaxaysa 5 ilaa 300 oo doolar – sidan ayaa kuu fiican hadii aad kaadhka mar-mar adeegsatid.
3. Kaadhka taabsii mashiinka kaadhka akhriya marka aad gaadiidka fuusho.

4. Gaadh meesha aad rabto in aad tagto!

Lacag intee leeg ayaa ii dhigmaysa?

Waxa aad bixin doontaa kaliya 1.5 doolar safar kasta, wakhti kasta oo maalintii ah, waa safarada ku kooban ha lama laba soone ahna basaska Metro Transit ama tareenka fudud ee Sound Transit Link ama tareenka taraamka Seattle. Basaska Kitsap Transit iyaga waxa lagu raaca 1 doolar.

Tagsiga biyaha ee Degmada King waxa isaga lagu raaca 3 doolar marka lagu socdo Galbeedka Seattle ama Badhtamaha Seattle, ama 3.75 doolar marka lagu socdo Jasiirada Vashon ama Badhtamaha Seattle.

Markaa, hadii aad laba bas raacdo maalintii, shan maalmood todobaadkii, adigoo raaca gaadiidka Metro Transit isagana gooshaya laba soonee kuna beegan wakhtiyada saxmada, waxa kuu dhigmi karta lacag gaadhaysa 910 oo doolar sannadkii.

Ku Saabsan Degmada King

Degmada King waxay aaminsan tahay in cid kastaa ay tahay in ay awood u yeelato in ay adeegsato gaadiidkayaga dadweynaha, markaa waanu ku faraxsanahay in aan soo bandhigno barnaamijkan, kaasoo ah kii ugu horeeyay ee noociisa ah ee qaranka laga hirgaliyo.

Sinaantu waxay cid kasta u saamaxaysaa in ay kobocdo waxaanay xoojisaa qarankeena. Waxan rajaynaynaa in barnaamijka ORCA LIFT uu qof kasta oo degen Degmada King awood u siin doono in uu adeegsado gaadiidka transit-ka.

Macluumaad Dheeraad Ah

(206) 553-3000

(800) 756-5437

orcalift.com